



## **Wixii isboortiga soo kordhay: Cleveland waxay ku guulaysatay lagdanka PIL sanadkii 9<sup>aad</sup> oo xiriir ah; gabdhaha Granta, wiilasha Lincoln waxay ku guulaysteen dabbasha**

Cleveland waxay sii waddaa orodka ay ugu jirto xagga sare ee Horyaalka Dugsiyada Dhexdooda ee Portland ee lagdanka, iyadoo isticmaalaysa qotadeeda iyo mansabyada laba kooxood oo culayska ah si ay ugu guulaysato ciyaarta degmada ee horyaalka sanadkii sagaalaad oo xiriir ah. The Warriors waxay urursadeen 324.5 dhibcood dugsiga sare ee Marshall High School si ay uga sii durkaan 93 ka ku soo xiga oo ah Grant.

Cleveland waxay ku heshay mansabyo gaar gaar ah Logan Medford oo fasalka koowaad ah, kaasi oo ku guulaystay horyaalka ciyaarta 126-rodol isagoo ku lagday 34 ilbiriqsi, iyo wiilka da'da yar Patrick Brown, kaasi oo ku guulaystay mansabka 138 isagoo ku lagday 1:06. Waxa soo raaca 18 kale oo ah kuwa lagdanka u ciyaar Cleveland kuwaasi oo keenay dhibco iyagoo ku dhammaystay siddeedda u sarreeya ee kooxohooda culayska.

Qotada Warriors waxay ka adkaatay dadka sida gaar gaarka shaqada wacan u qabtay ee ka socda Grant, taasi oo ku guulaysatay mansabyada dadka gaar gaarka ah, iyadoo Kai Tsugawa oo fasalka koowaad ah ku guulaystay 132, Cormac O'Hagan oo fasalka afraad ah uu helay 182, Simon Porter oo fasalka labaad ah uu helay 195 oo Jordan Reed oo fasalka afraad ah uu helay 285.

Jefferson wuxuu ku guulaystay saddex kooxaha culayska ah: Anthony Branch oo fasalka saddexaad ah wuxuu helay 106, Khtrelle Preston oo fasalka koowaad ah wuxuu helay 113 iyo Michael Preston oo fasalka afraad ah wuxuu helay 160. Wilson wuxuu helay laba guulayste oo kala ah Gus Johnson oo fasalka koowaad ah oo helay 120 iyo Jack Walker oo fasalka afraad ah oo helay 152.

Horyaalada kale waxay ahaayeen ardayga fasalka afraad ee Franklin Micky Marchello oo helay 145, ardayga fasalka afraad ee Madison Everett Chiles oo helay 170 iyo ardayga fasalka saddexaad ee Roosevelt Joshua Larrabee oo helay 220.

[\(Fiiri natiijooyinka dhammaystiran\)](#)

Ciyaartu waxay sidoo kale u ahayd u soo bixitaan ciyaarta gobolka ee Fasalka 6A, iyadoo saddexda ugu sarreeya ee koox culayseed kasta ay sare u kacayso, oo kuwa kaalinta afraad galayna meel lagu ururinayo si loogu raadiyo meelo. Ciyaarta gobolka waxa lagu qaban doonaa 28-29 Febraayo Memorial Coliseum.

Munaasabadda gobolka sidoo kale waxa kujira isku-aadka horyaalka gabdhaha oo dhammaystiran. Lagdamayaasha PIL waxay ku dhammaystireen u soo bixidda gobolka bishan Cottage Grove. Ardayga fasalka saddexaad ee Lincoln Sophie Keefer ayaa kaalinta labaad ku galay 125, ardayga fasalka afraad ee Franklin Dore Young ayaa isna kaalinta labaad ku galay 235. Iyaga iyo qaar kale oo afarta ugu sarreeya galay waxay ka ciyaari doonaan gobolka.

**Dabbaasha:** Grant iyo Lincoln waxay isla galeen tartan adag oo ka dhacay horyaalada degmada ee PIL oo ku yaala Xarunta Bulshada Dishman, iyadoo Grant ay ugu guulaysatay horyaalnimada gabdhaha 18 dhibcood, oo Lincoln-na ay ku heshay mansabka kooxda 10 dhibcood.

Gabdhaha Grant waxa hoggaanka u hayay ardayga fasalka labaad Quinn Brown, taasi oo ku guulaysatay 200- iyo 500-tallaabo mansabyada dabbaasha xorta oo ku dabbaalatay lug guulaysiga General ee 200 iyo 400 ee kooxaha tartamaya. Grant wuxuu guulaystay lix kamid ah 11 tartan.

Laba ardayda fasalka labaad ah ayaa ku guulaystay laba tartan kulanka gabdhaha: Hazel Derr oo Jefferson ka socota oo ku guulaysatay 100 dabbaasha xorta ah iyo 100 dabbaal-qadaadeedka, iyo Katherine Adams oo Lincoln ka socota oo ku guulaysatay 200 ee isku-darka gaar gaarka ah ee dabbaasha iyo 100 oo dabbaasha biriiis-istarooqga ah.

Ciyaaraha wiilasha, ardayga fasalka afraad Peter Hinnen wuxuu ku guulaystay laba tartan (100 batar-falay iyo 100 biriiis-istarooqga) wuxuuna dabbaasha isku ahaan 200 si uu u hoggaamiyo Lincoln. Ardayga fasalka afraad ee Cleveland Cody Soo ayaa ku guulaystay 200 iyo 100 dabbaasha xorta ah, iyo ardayga fasalka afraad ee Wilson Isaac Anderson ayaa isna ku guulaystay 200 ee isku darka gaar gaarka ah iyo 100 dabbaal-qadaadeedka.

[\(Fiiri natiijooyinka dhammaystiran\)](#)

Guulaystayaasha tartan kasta waxay u soo baxeen horyaalka gobolka Fasalka 6A oo lagu qaban doono Jimcaha iyo Sabtida Tualatin Hills Aquatic Center ee Beaverton. Guulaystayaal kale oo degmada ah oo buuxiyey shuruudaha soo bixista ayaa sidoo kale ka tartami doona gobolka.

**Munaasabadda xegada ee lacagta loogu ururinayo PIL:** Diiwaangalintu way socotaa mid kamid ah dadaalada qaadhaan ururinta ugu waawayn ee PIL. PIL Open Golf Scramble ee sanadlaha ah ee toddobaad waxa lagu qaban doona Arbacada, 10 Juunyo Reserve Vineyards iyo Golf Club ee Aloha.

Kuwa raba inay kaqaybqaataan waxay haystaan qaabab badan oo ay sidaas ku yeeli karaan, laga bilaabo iibsiga tigidhka \$35 ah ee qadada iyo bandhigga ciyaarta kadib, ilaa fursadda kafaalo qaadista mansabka ee \$10,000. Dugsiyada dadweynaha Portland, hal arday saddexdii ardayba fasalada 6-12 ayaa kaqaybqaata ciyaaraha PIL. Shantii sano ee tagay, kaqaybqaadashada isboortiyada PIL waxay ka soo kortay 5,500 oo arday waxayna gaartay 13,000 taasi oo kordhisay baahida loo qabo khayraad.

Fadlan booqo [web-beyjka diiwaangalinta](#) haddii aad rabto inaad kaqaybqaadato.